# Khatarta furiinka

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**"والصُّلْحُ خَيْرٌ"**

**(heshiiskaana khayr ah)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Islaamka wuxuu siiyay nolosha guurka qudsiyad gaar ah, wuxuuna jideeyay xagga xuquuqda iyo waajibaadka iyo aadaabta wixii damaanaqaadi lahaa sugnaanshaha nolosha iyo isku xirnaanshaheeda iyo sii jiriddeeda iyadoo ku sugan deganaan iyo kalgacal iyo naxariis iyo texgalain labada dhinac, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**"وَعَاشِرُوهُنَّ بِالمَعْرُوفِ"**

**(kulana Noolaada si Fiican)** nabigeenana (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee) wuxuu leeyahay:

**(خَيْرُكُمْ خَيْرُكُمْ لأَهْلِهِ).**

**(Kiina ugu khayrka badan waa kan ehelkiisa ugu khayrka badan)**

Qofka fiirfiirinaya quraanka kariimka wuxuu ogaanayaa in Alle (caza wa jalla) uu ku magacaabay guurka ballan adag; siduu

u caddeeyo tixgalintiisa inay waajib tahay, iyo siduu uga digo halista burburintiisa, wuxuu leeyahay Alle (caza wa jalla):

**"وَأَخَذْنَ مِنْكُمْ مِيثَاقًا غَلِيظًا".**

**(oo ayna idin ka qaadeen ballan adag)**

Shareecada Islaamka ayaa ugu baaqday labada qof ee is qaba in ay si cadaalad ah ku eegaan lammaanahooda nolosha, iyo inuu eego dhinacyada wanaaga ku jira, waxana uu ka fikiraa faa'iidooyinka ku jira ilaalinta nolosha qoyska, sida deganaanta, xasilooni nafsiyeed iyo mid dhaqan, iyo farxada ubadka, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**"وَعَاشِرُوهُنَّ بِالْمَعْرُوفِ فَإِنْ كَرِهْتُمُوهُنَّ فَعَسَى أَنْ تَكْرَهُوا شَيْئًا وَيَجْعَلَ اللَّهُ فِيهِ خَيْرًا كَثِيرًا"**

(**kulana Noolaada si Fiican, haddaad Kahataan waxaa Suurowda inaad Kahataan wax uu Yeelo Eebe dhexdiisa Khayr Badan**), wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(لا يَفْرَكْ مُؤْمِنٌ مُؤْمِنَةً، إنْ كَرِهَ منها خُلُقًا رَضِيَ منها آخَرَ)،**

**(Nin mu'min yuuna ka caroonin haweeney mu'minad ah haddii uu dabci ku naco mid kale ayuu kaga raalli noqonayaa),** kamaalka Alle kaliyaa iska leh dhowrsanaantana waxaa iska leh anbiyada Alle iyo rusushiisa maxaa ka fiican qofkii yiri:

**ومَنْ ذا الذي تُرْضَى سجاياهُ كلُّها *** كفى المرءَ نُبلاً أن تُعدَّ معايبُه**

**Waakuma kan dabeecadihiisa dhan raalli laga yahay**

*******

**Qofka sharaf waxaa ku filan in ceebihiisa la tiriyo**

Shaki la'aan, nolosha guurka waxaa laga yaabaa inay hoos yimaadaan aragtiyo wax u dhimaya xasiloonida qoyska, sidaas

darteed, waxaynu ogaanaynaa in Qur'aanka kariimka uu u dejiyay daawada waxtarka leh, wuxuuna caddeeyay in wanaag kasta uu ku jiro heshiis, isfahan, is-afgarad iyo wanaag, wuxuu leeyahay Alle (SW)

**"وَإِنِ امْرَأَةٌ خَافَتْ مِنْ بَعْلِهَا نُشُوزًا أَوْ إِعْرَاضًا فَلَا جُنَاحَ عَلَيْهِمَا أَنْ يُصْلِحَا بَيْنَهُمَا صُلْحًا وَالصُّلْحُ خَيْرٌ وَأُحْضِرَتِ الْأَنْفُسُ الشُّحَّ وَإِنْ تُحْسِنُوا وَتَتَّقُوا فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا"،**

**(hadday Haweeney ka cabsato Ninkeeda xaggiisa fogaansho ama jeedsasho dhib ma saara korkooda hadday heshiiyaan heshiis, heshiiskaana khayr ah, waxaana lagu soo kulmiyey nafta bakhaylnimo, haddaad Wanaag fashaan ood dhawrsataan Eebe waxaad Camal falaysaan waa ogyahay),**

Haddaba haddii arrintu u baahan tahay in qoyska lammaanaha dadka leh caqliga iyo xigmadda iyo waayo-aragnimada iyo wanaaga iyo taqwada ay soo dhexgalaan, markaas waa inay noqotaa faragelin wanaagsan oo la doonayo in dib-u-heshiisin lagu sameeyo oo meesha laga saaro sababaha khilaafka, wuxuu leeyahay Alle:

**"وَإِنْ خِفْتُمْ شِقَاقَ بَيْنِهِمَا فَابْعَثُوا حَكَمًا مِنْ أَهْلِهِ وَحَكَمًا مِنْ أَهْلِهَا إِنْ يُرِيدَا إِصْلَاحًا يُوَفِّقِ اللَّهُ بَيْنَهُمَا إِنَّ اللَّهَ كَانَ عَلِيمًا خَبِيرًا"،**

**(Haddaad ka cabsataan iskhilaafka dhexdooda u bixiya garsoore ehelkiisa ah iyo garsoore ehelkeeda ah, hadday doonaan wanaajinna Eebe wuu iswaafajin dhexdooda, Eebana waa oge xeeldheer)**, taasna waxaa ku sugan ajir weyn, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**"لا خَيْرَ فِي كَثِيرٍ مِنْ نَجْوَاهُمْ إِلَّا مَنْ أَمَرَ بِصَدَقَةٍ أَوْ مَعْرُوفٍ أَوْ إِصْلَاحٍ بَيْنَ النَّاسِ وَمَنْ يَفْعَلْ ذَلِكَ ابْتِغَاءَ مَرْضَاتِ اللَّهِ فَسَوْفَ نُؤْتِيهِ أَجْرًا عَظِيمًا"**

**(Khayr ma leh wax badan oo faqooda ah, oon ahayn mid fara sadaqo ama wanaag ama hagaajin dadka dhexdooda, ruuxii fala saas asoo doonayo raalli ahaanshaha Alle waxaanu siin ajir weyn),** wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(أَلَا أُخْبِرُكُمْ بِأَفْضَلَ مِنْ دَرَجَةِ الصَّلَاةِ وَالصِّيَامِ وَالصَّدَقَةِ؟ قَالُوا: بَلَى، قَالَ: إِصْلَاحُ ذَاتِ الْبَيْنِ)**

**(Ma idin sheegaa wax ka darajo badan salaadda iyo soonka sadaqada?), waxay dhaheen haa, wuxuu yiri: ( waa kala maslaxaynta)**

Haddiise ay gaarto arrinta inaan lagu sii socon karin nolosha guurka, shareecadu waxay ina faraysaa in loo fiirsado ilaa ay dabayshu ka degto, quluubtuna jilacado, naftuna ay saafi noqoto, caqligana la shaqaysiiyo, markaas dib u eegis ayaa dhacaysa, dib-u-heshiisiintuna way soo noqonaysaa, iyadoo lagu dadaalayo jiritaanka qoyska

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan ugu sharafta badan khalqiga sayidkeena Muxammad iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan

Shaki kama taagna inuu yahay furiinka mid duminaya guri uu sharciga faray in lagu dhiso deganaan iyo kalgacal iyo naxariis, sidoo kale wuxuu wataa halis iyo dhibaatooyin qabsanaya qoyska, iyo bulshada, siiba ilmaha kalatagga labada waalid waxa uu u keeno xagga nafsiga iyo bulshada iyo dhaqaalaha; waxay waaynayaan tarbiayada wanaagsan, iyo barbaarinta fiican, burburka qoyska dartii, taas waxay u keenaysaa jahwareer nafsi ah, iyo dibudhac xagga waxbarashada, waxaa sahal noqonaya in dhaqankooda hallaabo ama ay jiitaan kooxaha xagjirka iyo argagixisada, sidaa awgeed shaydaanka wuxuu lumiyaa labada is qaba si ay u burburiyaan dhismaha qoyska, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إنَّ إبْلِيسَ يَضَعُ عَرْشَهُ علَى الماءِ، ثُمَّ يَبْعَثُ سَراياهُ، فأدْناهُمْ منه مَنْزِلَةً أعْظَمُهُمْ فِتْنَةً، يَجِيءُ أحَدُهُمْ فيَقولُ: فَعَلْتُ كَذا وكَذا، فيَقولُ: ما صَنَعْتَ شيئًا، قالَ: ثُمَّ يَجِيءُ أحَدُهُمْ فيَقولُ: ما تَرَكْتُهُ حتَّى فَرَّقْتُ بيْنَهُ وبيْنَ امْرَأَتِهِ، قالَ: فيُدْنِيهِ منه ويقولُ: نِعْمَ أنْتَ)**

**(Ibliis wuxuu dhiganayaa kursigiisa biyaha, kaddib wuxuu soo dirayaa guutooyinkiisa, kan isaga ugu dhow waa kan ugu fidnada badan, midkooda ayaa imaanaya wuxuu oranayaa: sidan iyo sidan ayaan sameeyay, wuxuu oranayaa wax ma aadan samynin, wuxuu yiri: kaddib midkooda ayaa imaanaya wuxuu oranayaa: ma dhaafin ilaa aan ka kala geeyo isaga iyo naagtiisa, wuxuu yiri: wuu soo dhoweysanayaa wuxuu oranayaa: adigaa fiican)**, taasoo

keenaysa inaan ka digtoonaano oo aan ka shaqayno sidaan uga fakan kahayn xariga shaydaanka.

Maxaa ka qurux badan in jiro heshiis iyo tixgalin iyo jacayl ka dhexeynaya qoyska oo dhan ilaa laga helo isku xirnaan iyo xasilooni bulshada dhexdeeda oo dhan.

**Ilaahyow quluubteena isu keen heshiisna na dhex dhig**